| **SHAXDA 1:** ***Isticmaalka internetka ee hadda*** | **Lambarka qofka la wareysanayo ________** |
|---|---|

**Su'aasha Muhiimka 1: Sidee iyo halkee ayaad adiga ama qoskaadu ku isticmaashaan Internetka – hadday tahay kombuterka ama telefoonka gacanta?**

---

**Su'aalaha la socda ee ISTICMAALAHA INTERNETKA**

1. Maxaad isticmaasha si aad Internetka u hesho? ❑ Kombuterka Miiska, ❑ Labtob-ka, ❑ Tablet-ka, ❑ Telefoonka gacanta
2. Guriga kombuter ma kuu yaala? ❑ Haa ❑ Maya
3. Gurigaagu Internet ma leeyahay? ❑ Haa ❑ Maya

| Hadday MAYA tahay (Internetka guriga) | Hadday HAA tahay (Internetka guriga) |
|---|---|
| Ma jeclaan lahayd inuu gurigaadu lahaado Internet? ❑ Haa ❑ Maya<br>Sababta ama maxaadan u rabin?<br><br>Maxaa gurigaadu Internet aanu u lahayn? | Baahidaada ma ku filan tahay? ❑ Haa ❑ Maya<br><br>Haddii aanay kugu filnayn, maxaa ka fiicnaan lahaa? |

4. Ma isticmaasha kombuterka xarunta jaaliyadda, maktabadda, shaybaarka kombuterada, kuwa saaxiibada ama qaraabada? ❑ Haa ❑ Maya
   Haddii ay HAA tahay, waa sidee isticmaalka kambuterkaas? (waxa uu ku fiican yahay ama ku xun yahay)

   Ma ku filan yahay baahidaada ama wax ayaa laga hagaajin karaa? ❑ Waa ku filan yahay ❑ U baahanay mid ka fiican
   Fadlan noo macnee:

5. Wax dhibaato ah ma ku qabtaa isticmaalka kombuterada iyo Internetka? ❑ Haa ❑ Maya (Macnee)

6. Maxaad ugu jeceshay inaad heysato kombuter ama Internet?

**Su'aalaha la socda DADKA AAN ISTICMAALIN INTERNETKA (ku qor bogaan dhiciniisa danbe)**

1. Ma jeclaan lahayd inaad isticmaasho kombuter ama Internet? ❑ Haa ❑ Maya

a. Hadday HAA tahay, waa maxay waxyaabaha aad u isticmaali lahayd?

b. Maxaa ku diidaya inaad hadda isticmaasho? Laga yaabe inaad ku cusub tahay ama aadan mid haysan ama aadan garanayn meesha aad ka heli karto mid aad isticmaasho oo bilaash ah?

c. Maxaad u baahan tahay si aad mid u isticmaasho? (Kombuter? Helida Internetka? Barashada sida loo isticmaalo?)

2. Haddii aanu gurigu qabin Internet: Maxaa gurigaagu Internet u yeelan waayay?

**Su'aasha Muhiimka 2: Ma isticmaasha Facebook ama warbaahinta kale ee bulshada iyo ma u isticmaali lahayd inaad kula xariirto dowladda?**

---

**Ma isticmaasha barnaamijyada wada xariirka bulshada, sida Facebook, Twitter, ama LinkedIn?** ❑ Haa ❑ Maya

Haddii ay HAA tahay, isticmaalka barnaamijyada wada xariirka bulshada

1. Midkee baad isticmaasha?

2. Maxaad ku jeclaatay isticmaalkiisa?

3. Maxaadan u jecleen?

4. Maxaad u malaynaysaa fikradda ah isticmaalka Facebook ama Twitter si aad u hesho warbixinta dowladda hoose ama si aad u siiso warbixin ama fikradaada dowlada hoose?

Haddii ay MAYA tahay, aadan isticmaalin warbaahinta wada xiriirka bulshada (ku qor boggan xagiisa danbe)

Ma jeclaan lahayd inaad isticmaasho Facebook ama Twitter? ❑ Haa ❑ Maya

1. Maxaa ku diiday inaad isticmaasho Facebook ama Twitter?

2. Haddii magaaladu biloowdo inay macluumaad badan ku bixiso Internetka – sida emaylka, Facebook, ama Twitter, ma isku dayi lahayd inaad biloowdo inaad isticmaasho, si aad ula socoto macluumaadka?

3. Maxay kula tahay fikradda ah in magaaladu ay macluumaadka ku bixiso habkaas, ama ay dadku habkaas macluumaad ku helaan? Ma kula tahay inuu habkaasi shaqeeynayo? Maxay ku wanaagsan tahay ama ku xun tahay arintaasi?

**SHAXDA 3:** ***Internet Aad u Dheereysa*** **Lambarka qofka la wareysanayo ________**

**<u>Su'aasha Muhiimka 3</u>: Waa maxay adeegyada cusub ee isticmaalka Internetka aad u dheereya ee aad doonayso iyo maxaad welwel ah oo aad ku qabtaa?**

---

Magaaladu waxay ka shqeynaysaa sidii ay guryaha ku soo gaarsiin lahayd Internet aad u dheereeysa. Haddii aad midaas hesho, waxaad soo booqan kartaa dhaqtarka ama kalkaalisada adigoon gurigaaga ka bixin ama waxaad ka qeybgali kartaa fasal oo aad awoodi kartaa inaad aragto macalinka oo aad su'aalana weydiin kartaa – adigoo gurigaaga jooga. Iyo haddii aad hayso shaqo ama aad tabaruce tahay, waxaad la shaqeeyn kartaa kooxdaada shaqada sidii adigoo la jooga. Iyo haddii aad guriga ka maqan tahay, waxaad ku ilaashan kartaa gurigaaga, sida adigoo la soconaya dadka ku baahan ee guriga jooga (sida waalidinta waayeelka ama caruurtaada) ama xataa kala socoto waxa ay sameeynayaan xayawaanka carbiska ah.

1. Ma u maleeynaysaa inaad jeclaan lahayd inaad isku daydo qaar ka mid ah adeegyadaas? Maxaad u maleeynaysa inaad aad u xiisaynayso?

2. Ma jiraan wax ka mid ah adeegyadan oo kaa dhigaya inaad doonayso inaadan isticmaalin?

3. Ma jiraan adeegyo kale oo aad u maleynayso inaad qaban lahayd adigoon guriga ka tagin?

<u>**Su'aasha Muhiimka 4**</u>**: Waa maxay hababka ugu fiican ee aad ula xariiri karto dowladda iyo maxaad kale oo aad dooni lahayd inaad ka ogaato teknoolijiyada?**

---

1. Waa maxay hababka ugu fiican ee aad ku heli karto macluumaadka Magaalada iyo kooxaha jaaliyadda?

2. Maxaad u maleynaysaa inay yihiin hababka ugu fiicaan ee aad fikradaada ku siin karto Magaalada?

3. Maxaad u maleynaysa inay Magaaladu sameeyso si ay si fiican kaaga caawiyaan si aad u hesho macluumaad aad u baahan tahay ama ku fududeyn kara inaad ka qeybgaadato hagaajinta jaaliyadda?

4. Maxaad u maleynaysaa inay kuu saamixi karto in aad doonto inaad si aad ah ugu soo booqato Seattle.gov, websaydka magaalada ama aad u fiirsan lahayd telefishinka Seattle Channel?

5. Maxaad jeclaan lahayd in aad si aad ah wax badan uga barato kombuterada, Internetka iyo warbaahinta bulshada?

6. Maxaa adiga aad kugu fiican? Fasallo, kulan-hawleedyo gaaban, tababar shaqsiyeed, fiirsashada fiidiyoowga ama wax kale?